

Caawimadda Dhimashada ula kaca ah

Warqadda Dooda Xaqiiqda ah

Fariimaha Ugu Muhiimsan

- Qof kastaa wuxuu xaq u leeyahay inuu samaynsan karo doorashooyin ku saabsan noloshiisa/nolosheeda.
 - Dowladda Galbeedka Australia ayaa doonaysa inay samayso sharciyo u ogolaanaya qaybka mid ah dadka waaweyn inay weydiistaan caawimaad caafimaad si ay uga takhalusaan noloshooda mar haddiiba ay dhimanayaanba si xunna u dhibaataysan yihiin
 - Sharciyadani waxay noqon doonaan kuwo aad u adag
 - Koox khabiir ah ayaa ka caawinaya dowladda si loo go'aamiyo sida ay u shaqayn karaan sharciyadu
 - Imika waxaa lagu weydiinayaa fikiradahaaga iyo aragtiyahaaga kuwaajahan tan.
-

Waa maxay ku caawinta dhimashada ula kaca ah?

Ku caawinta dhimashada ula kaca ah micnaheedu waa inay qaarka mid ah dadka waaweyni weydiisan karaan caawimo caafimaad si ay uga takhalusaan noloshooda haddii ay la noolyihiin cudur ama xanuun aad u daran kaa soo sababaya dhimashadooda isla markaana aad ugu dhibaataysan yihiin.

Yuu caawin doonaa?

Haddii sharciyada lagu sameeyey Galbeedka Australia waxaa la rajaynaa in tani caawin karto Dadka Galbeedka Australia kuwaa soo oo jira ugu yaraan 18 sano isla markaana go'aankooda qaadan kara. Waa inay qaadan karaan go'aanka iyadoon cadaadis uga imanayn cid kale. Waa inay la noolyihiin cudur ama xanuun kaasoo sababaya dhimashadooda isla markaana ay aad ugu dhibaataysan yihiin.

Sidee laga yeelayaa qofka uu hayo xanuun maskaxda ah ama naafonimadda?

Miyaa la filayaa in qofka kaliya ee haysta xanuunka maskaxda/dhimirka ama naafnimada in aanuu heli karayn caawimada dhimashada iskeed ah. Sidoo kale waa inay la nool yihiin cudur ama xanuun kasoo sababi doona dhimashadooda isla markaana u keenaya inay aad u dhibaatoodaan.

Sidee loo samaynayaa go'aanka? Ma hubin karnaa inay tahay mid badbaadsan?

Miyaa la filayaa in qofku u baahan doono inuu la kulmo laba dhakhtar iyo inay dhakhaatiirtu isku waafaqaan in xaalada qofku ku haboon tahay sharciga. Dhakhaatiirtu waa inay hubiyaan inaan qofna ku khasbayn inay gaadhaan doorashada/go'aanka. Mararka qaar dhakhtar kale ayaa la weydiin karaa fikirkiisa/keeda sidoo kale.

Qofku wuxuu markasta xaq u leeyahay inuu yidhaahdo "Maya".

Maxaan kaloon u baahanahay inaan ogaado?

Tani waa waraaq xaqiiqo ah oo fudud mana ku jiraan dhamaan macluumaadka ku caawinta dhimashada iskeed ah.

Halkee ka heli karaa macluumaad dheeri ah?

Warqada dhamayska tiran ee dooda waxay leedahay macluumaad qotodheer oo dheeri ah kuna saabsan sharciga ugu macquulsan iyo sida uu u shaqayn karo. Sidoo kale wuxuu leeyahay su'aalo ay tahay inay dadku tixgaliyaan.

Warqada dhamayska tiran ee dooda waxaad ka heli kartaa bogga interneetka (warbixino dheeriya ee hoose). Qaybaha la tixi karo ama laga daawan karo bogga websaytka.

Sideen dowladda ugu sheegi karaa aragtidayda?

Koox khabiiri ah ayaa ku qaban doona kulamo Perth iyo gobolka WA. Waxay sharxi doonaan fikradaha waxayna tixi doonaan waxay dadku yidhaahdeen.

Fadlan ka soo qaybgal kulamadan. Macluumaadka dheeriga ah ee kulamada waxay ku jiraan bogga interneetka.

Sidoo kale waad ka jawaabi kartaa su'aalaha ku jira bogga interneetka, adigoo kusoo diraya iimayl ama usoo qoraya waraaq kooxda khabiirada ah. Macluumaadka aad bixiso waxaa la dhigi doonaa bogga interneetka ilamaa aad adigu diido in la dhigo.

Bogga interneetka: health.wa.gov.au/voluntaryassisteddying

Iimayl: VADconsultations@health.wa.gov.au

Boostada: *Guddiga Khubarada Heer Wasiir ee Caawinta Dhimashada ula Kaca ah*
PO Box 8172
Xarunta Ganacsiga ee Perth
Perth WA 6849